

Shuruudo amaah oo ku saabsan qalabyada dijitaalka ah ee guriga amaah ahaan loogu qaato

Degmada Norrköping



Degmada Norrköping waxey haddii aad arday taahy ku siineysaa qalab dijitaal ah oo aad guriga amaah ahaan ugu qaadan kartid inta aad iskuulka dhigatid. Qalabka dijitaalka ah ee aad amaahaneysid waxuu ku xiran yahay hadba waxbarashada aad dhigatid. Shuruuddaan amaah waxaa qalabka dijitaalka ah loogu yeeraa "shey".

Marka aad saxiixeyso shuruudda amaahda waxaad ballan qaadeysaa in aad raaceyso sharciyada isticmaalid ee iskuulka. Haddii aad jabisisd sharciyada waxaa dhici karta in uu iskuulka kaala laabto qalabka ama in uu kaa joojiyo qaar ka mid ah adeegyada. Xadgudubyo soo noqnoqdo waxey keenayaan ciqaab adag.

Shuruudda amaahda waxaa saxiixaya ardayga iyo waalidka, haddii uu ardayga qaan gaar yahay saxiixa ardayga bis ayaa ku filan.

Shuruudda amaahda

Shuruuddaan amaah waxaa lagu jaangoynayaa xiriirka soke ee labada dhinac kuna saabsan isticmaalka shakhsiyeed ee qalab dijital ah ee degmada Norrköping.

Xaq lahaansho

Qalabka waxaa leh degmada Norrköping. Ardayga kuma wareejin karo qof kale xuquuqda iyo waajibaadka saaran ee waafaqsan shuruudda amaahda. Qalabka lama rahmin karo, lama amaahin karo si kalana rahmid ahaan meel looma dhigi karo si wax kale loo deynsado.

Damaanad

Qalabka wuxuu leeyahay damaanad ka socota soo saaraha.

Damaanadda kuma jiro haddii ey fiilo go'do . ama qalabka korontada qeybiya.

Masuuliyad lacag bixin haddii uu dhaawac loo qeysto qalabka ama uu lumo

Haddii uu qalab ama jaajar dhaawac soo gaaro ama ey lumaan waxaa dhici karta in ardayga uu magdhow ka bixiyo dhaawaca sida uu dhigayo sharciga.

Dib u celin

Marka ey waxbarashada dhamaato ama la joojiyo waa in qalabka iskuulka dib loogu soo celiyaa. Qalabka waa in lala soo celiyaa waxyaabihii la socday marka la amaahinayay (jaajar iyo boorso). Waa la baarayaa qalabka marka la soo celiyo.

Haddii ardayga uusan sheegin dhaawacyo ama cillad xaga shaqeeynta ah marka ey yimaadaan, degmada ey ka dayacanto fursad ey sistemka damaanad qaadka qaladka loogu sameeyo, markaas waxaa dhici karta in ardayga uu bixiyo qarashka ku kacaya sida uu dhigayo sharciga.

Sharciyada isticmaalka

Ardayga waxaa saaran waajib ah inuu raaco sharciyada isticmaalid. Haddii uu ardayga jabiyo sharciyadaas waxaa dhici karta in la xadido xuquuqda isticmaalka. Haddii la tuhmo dembi wuxuu iskuulka ama waaxda dijitaaleynta xaq u leeyihiin in ey kontoroolaan waxyaabaha loo isticmalay qalabka si loo fiiriyo in sharciyada iyo qawaaniinta degsan la raacay.

- Qalabka waxaa loogu tala galay shaqada iskuulka.
- Ardayga ayaa masuul ka ah qalabka iyo waxa loo isticmaalayo.
- Qalabka waa in lagu xiraa nambar shakhsiyeed sir ah.
- Qalabka waa in isha lagu hayaa, waa si ammaan leh loo xafidaa loona taransborgareeyaa waana in si wanaagsan oo laga fiirsaday loo isticmaalaa.
- Macallinka xisada leh ayaa go'aminayo haddii qalabka la isticmaali karo xisada gudaheeda.
- Haddii uu jiro maqnaasho badan oo aan sax aheyn, wuxuu iskuulka go'aamin karaa in qalabka la isticmaalo oo kaliyah marka uu ardayga iskuulka joogo.
- Haddii uu qalabka jabo ama lumo waa in sida ugu dhaqsiyaha badan loo sheegaa macallinka ardayga ama masuulka IT-ga.

Nuuca qalabka iyo nambarka tixanaha ah: _____

Nambarka tixanaha ah wuxuu ku qoran yahay Självserviceportalen

Saxiix

Norrköping taariikhda _____
Magaca (Mudiir ama qof u dhigma)

Aniga/annaga waxaan caddeyneynaa in aan qeyb ka qaadannay shuruudda amaalha
waana oggolnahay sharciyada amaalha guri ee qalabka dijitaalka ah

Norrköping taariikhda _____

Saxixa ardayga _____ Magaca oo kala dhig dhigan

Saxixa waalidka _____ Magaca oo kala dhig dhigan

Saxixa waalidka _____ Namnförtydligande

¹ Haddii uu ardayga qaan gaar yahay saxixa waalidka shardi maaha

Qalab la soo celiyay

- Qalabka waa lasoo celiyay
 Qalabka waa maqan yahay ama waa dhaawac

_____ Taariikh _____ Saxiix, wakiilka iskuulka